

# Golaha Wakiilada JSL

## Waaxda Hadal-qoraalka iyo Gudiyadda

### Kal-fadhigii 28<sup>aad</sup> Fadhigii 5<sup>aad</sup>

Isniin 17/08/2015

Fadhigu Wuxuu furmey 10:07AM

**Gudoomiyaha:-** C/raxman Maxamed C/laahi (Cirro)

**Quraan:-** Xildibaan Obsiye

### **Ajendaha Fadhiga: - Dooda Xeerka Waxbarashada**

**Gudoomiyaha:-** ilaahey ha inagu anfao aayadaha quraanka kariimka ah, waxaynu bilaabaneynaa dooda xeerka Waxbarashada, Xildhibaanadu ha fadhiistaan, Waxaan ku soo dhoweynayaa Xildhibaanada dooda.

**Md. C/qaadir X. Ismaaciil Jirde:-**  
(8min 32sec) Shir-gudoonka iyo Mudanayaasha waad salaamantihiin, kaliya waxaan ka hadlayaa qodob aan ka hadli jiray markasta oo miisaaniyada la keeno Golaha, qodobkaas oo ah Tacliinta sare, Jaamacad, kuliyaad iyo wixii la mid ah sida aad wada ogtihiin barigii hore jaamacadaha dalku may gaadhayn ilaa labaataneeyo, maantana way kabadan yihiin ardayda wax ku barataana waa ilaa 30kun.

Waxaan soo jeedinayaa oo aan hore u soo jeedin jiray Tacliinta Sare wax wasiir lagu haleeyo oo uu soo magacaabo way dhaaftay, Jamacadeheenii waxa ka taagan waad ogtihiin hasii kala

darnaadeene, taasina masuuliyadeedii cid ay saaran tahay malahan maanta.

Wasiirka tacliinta sare way ku balaadhan tahay in uu daba socdo hawsha intaa leeg, waxaan leeyahay waa lagaadhay xiligii la samayn lahaa wasaarada tacliinta sare, dalalka dariskeena iyo cid walbaa way leedahay.

Halkan waxaa ku qoran Gudidda Tacliinta sare< Gudiddaasi waa Gudi Qaran Golahana war kama hayo oo xildhibaanada cid ka warhaysaa ma jiraan, wasiiraduna marka la yidhaa marka wasaaradaada waxbaa laga qaadayaa waxay moodaan xilkiisa

laga qaadayo ama awoodiisii laga qaadayo.

**Waxaan soo jeedinayaa** 30-kun ee arday ee ilaa ceerigaabo, laascaanood ilaa Borame taxani in aanay Gudiddaa Wasiirka hadhkiisa fadhidaa aanay ku filnayn, jaamacaduhu waa institutions aad u xaasaasi ah oo leh khusuusiyaad gaara, waana institutions qof suuqa laga soo qabtay aanu waxba ka qaban karin.

Waxaan mar labaad soo jeedinayaa ardaydaa cid walba u tafo xaydan tahay guddo iyo dibadda ku dhismi maayaan meelna ku mari maayaan Gudiddi uu Wasiir soo xulay oo aanay cidi ansixin ama Golaha Baarlamaanka aan soo marin. Waxaana leeyahay ama aan qabaa in Gudiddaa lagu badalaa Wasaaras Tacliinta Sare oo Golahana laga ansixiyo oo lala xisaabtami karo.

Waxaa kale oo jirta Maxkamadeheena in la ansixiyo Maxkamada oo kaliya taasina waa ilduuf weyn waayo gudoomiyuhu kaliya kuma eka kaligii markaa ilduufyada jira ayay ka mid tahay ha la buuxiyo taana waayo maanta waxaan leenahay dad badan oo aqoon yahano ah oo jamacadaha aduunka ka soo baxay ama wax ka dhigay waad ogtihiinoo jamacadeheeniina muhmal badan ayaa ka jira oo jamacadii Hargaysa ceeb ayay inagu tahay oo waxa ka socda oo aynaan waxba ku lahayn

waayo Gudidaana inagu maynaan ansixin shuqulna kuma lihin, qaabka loo maamulana ma ogin.

**Waxaan soo jeedinayaa:-**

1. Marka horaba Wasaaradeheenu way badan yihiine oo waliba waxaa ku jira kuwo aan waxba ku filnayne ha la sameeyo Wasaaradaa Tacliinta sare, si loo helo qof lagala xisaabtamo 30kaa kun ee institutions, waanad mahadsantihiin.

**Gudoomiyaha Cabdiraxmaan Cirro:-** Qodobkaa aad ayaa loo taageeray oo lagu raacey xildhibaanaka.

**Md. C/raxman Cismaan Caalin:-** (1min 46sec) Dhamaan Shir-gudoonka iyo Xildhibaanadaba waan salamayaa, saaka waxaa ina horyaala sida uu Gudoomiyuhu iclaamiyay Xeerka Waxbarashada, Wasaaradeenana waxaa la yidhaa Wasaarada Tacliinta Sare, Xeerkana waxaa uu dhigayaa kaliya waxbarashada hoose iyo ta dhexe kumana jirto tii sare, hadana waxaa uu ka hadlayaa Gudiddii tacliinta sare sida uu xildhibaan Cabdiqaadir uu halkan ka sheegayay, Markaa xeerkani sidiisa ayuu faashil u yahay waana incomplete xeerkani oo qaybo dhan oo tacliinta sare ah ayaa maqan.

Xeerkan hortena yaalaa maahan mid ka turjumaya Waxbarashada

maanta dalkeena taala, mana aha mid ka turjumaya rabitaanka jiilka maanta soo koraya, sidaa darteed waxaan leeyahay waa shaadh la soo tolay oo cid soo tolatay waana xeer uu wasiirku iska leeyahay awood kale oo ku taalaa ma jirto Xeerka.

Waxaana loo baahan yahay Tacliin iyo Waxbarasho tayo leh waayo imika inta aan ka warqabo laba ama sadex jeer ayaa labadalay Manhajka waxbarashada, waxaana loo baahan yahay Xeer ka turjuma baahida dalka ka jirta, waayo maalin walba dalkeena iskuulo privet ah ayaa la furaa, waxaany u qaybsamaan qaar Wasaarada ku xidhan, qaar aan ku xidhnayn iyo kuwo aanad garanayn meel ay la haystaan.

Xeerkana mugiisii ha loo yeelo waayo Guddi fadhiisatay oo ka shaqaysay ma jiraan waxaana odhan lahaa Xeerka Wasaaradii ha lagu celiyo oo xeer dhamaystiran ha la inoo keeno marka Golaha la keenana dad aqoon leh oo waxbarashada wax ka garanaya haloo dhiibo oo si wanaagsan uga shaqeeya xeerkan, markaas ayaan kala dooranaynaa ma kala jarnaa Wasaaradaha iyo in kale, sidoo kale Guddi haloo saaro workshops u qabata Xeerka, waanad mahadsantihiiin.

**Md. Xaamud Cismaan Cigaal:-** (1min 46sec) Shir-gudoonka iyo xidhibaanadaba waan salaamayaa labadii xildhibaan ee iga horeeyay

baa dhameeyay arimihii aan ka hadlilahaa waanan ku taageersanahay Md. Cabdiqaadir in loo baahan yahay in la kala saaro Wasaarada Waxbarashada iyo Tacliinta sare halka uu wasiirka ka magacaabay waxaan soo jeedinayaa anigu in laga dhigo waliba Hay'adda Madax banaan.

Sharcigana sidaa uu xildhibaan Cabdiraxmaan sheegay in aanu sharcigani aanu dhamaystirnayn.

### **markaa waxaan leeyahay**

2. aan dib ugu celino cidii soo samaysay ama halkanba aan kaga darnee waa in la haggaa jiyaa, oo Tacliinta sare laga dhigaa Hay'adda gaar ah.

**Point of order: - Md.**

**Cabdiraxmaan M. Jamac**

**(awxoog):-** waxaam leeyahay

xeerkani waa shaadh uu nin soo toshay guddiduna aad ayay u hadal hayaane waxaan soo jeedinayaa in xeerkan dib loo eego

**Md. C/qaadir Jaamac Xaamud:-**

(1min 46sec) Shir-gudoonka iyo Xidhibaanadaba waan salaamayaa, xeerkani waa Xeer aad iyo aad u muhiima waana loo baahan yahay in wasiirka loo yeedho oo wax laga waydiiyo waa muhiim.

Waxaa kale oo aan soo jeedinayaa in lagu soo daro iskuuladii farsamada gacanta iyo in la mideeyo fasaxyada, Waxaa kale oo jirta in markii hore la

odhan jiray wasaarada waxbarashada iyo Barbaarinta, in kastoo aanay jirin hada, waana muhiim in lagu daraa Barbaarinta Waana in la mideeyo mahajyada dalka, waad mahadsantihiin.

**Md. Faarax Maxamud Cabdulle:-**

**(1min 46sec)** Mudane Gudoomiye horta xeerkani waa xeer balaadhan akhriskiisa maalin iyo labo laguma dhameyn karo, balse anigu waxaan isku dayayaa intii aan ka gaadhsiiyay oo aa iyaduna yareyn inaan meelihii aan is dul taageey eego, Waxa kale oo aan soo dhoweynayaa oo taageerayaa Wasaarada Waxbarashada iyo Tacliinta sare waa Wasaarad balaadhan in la laka saaro oo tacliinta sare laga dhigo Hay'adda Madax banaan si ay uga baxdo siyaasadahan Wasiirada iyo saameyntooda, Markaa Xildhibaanadii soo jeediyay Waan ku taageersanahey.

Xeerkan inkastoo uu yahey Xeer balaadhan meelihii aan isdul taageey baan galayaa iminka.

**Qodobka 10<sup>aad</sup> Farqadaha 2<sup>aad</sup> iyo 3<sup>aad</sup>,** anigu waxaan ka dhigey farqada kaliya oo Waxaan soo jeedinayaa markii hore waxaa lagu qorey Maamulka Dugsiyada Quraanka iyo Barbaarinta markii dambena waa la sii kala saarey oo laba farqadood baa laga kala dhigay, sidaa darteed anigu waxaan ka dhigay **“Dugsiga Quraanka**

**kariimka iy barbaarinta waxa si gaaar ah u maalaya Wasaarada Diinta iyo Awqaafta, Wasaarada Waxbarashadu waxay ku leedahey kormeer”**

**Qodobka 11<sup>aad</sup> Farqada 4<sup>aad</sup>** oo u qorneyd *“lagu barbaariyo la-dhaqanka faciisa”* waxaan ku sii darey iyo dadkisa, iyadoo **noqoneysa “lagu barbaariyo la-dhaqanka faciisa iyo dadkiisa”** waayo faciisu wuxuu noqonayaa caruurta ay isku filka yihiin, markaa hadii caruurta ay is le'egyihin hadii lagu barbaariyo halka waxbaa ka dhiman, markaa waana in lagu barbaariyo la-dhaqanka dadkiisana.

**Qodobka 12<sup>aad</sup>** oo ah **Furashada Dugsiyada Barbaarinta Caruurta,** waxaan ku darey anigu Farqada 4aad oo noqoneysa sidan **“Goobta Barashada Quraanka iyo barbaarinta caruurta waa inay tahey meel xasiloon marka loo eego suuqyada iyo wadooyinka magaalooyinka”** waayo caruurta waa kuwo yar yar waxaana loo baahan yahay meesha wax lagu barayo inay tahey meel xasiloon oo gawaadhida iyo buuqa ka fog.

**Qodobka 13<sup>aad</sup> Farqada 1<sup>aad</sup>** waxaan soo jeedinayaa in laga dhigo oo loo badalo sidan, **“Dugsiyada Barbaarinta iyo Barashada Quraanka waa inay dhigaaan manhajka ay Wasaarada Diinta iyo awqaaftu u dejiso”** waayo waa

anigii markii hore idhi waa inay Dugsiyada quraanka iyo Barbaarinta maamusho Wasaarada Diinta iyo Awqaaftuye.

**Farqada 3<sup>aad</sup>** Waxaan ka dhigay halka Wasaarada Waxbarashada iyo Tacliinta Sare oo u badaley Wasaarada Diinta iyo Awqaafta, anigu ku sii darey ogeysiina la siiyo Wasaarada Waxbarashada, Marka waxay noqoneysaa sidan farqadu **“Dugsi kasta oo ah barbarian caruureed oo raba inuu fuliyo manhaj aan aheyn kan qaranka waa inuu ogolaansho ka helaa Wasaarada Diinta iyo Awqaafta ogeysiin la siiyo Wasaarada Waxbarashada iyo Tacliinta Sare si waafaqsan Xeerka”**.

**Qodobka 14<sup>aad</sup>** Halkan Xeerku wuxuu ku kala saarey Dugsiyadii Barbaarinta iyo kuwii Quraanka Kariimka lagu baranayay markaa marka horeba anigu waxaan soo jeedinayaa in aan la kala saarin oo la mideeyo, waayo caruurta waxa lagu barbaarinayo waa diintii iyo dhaqankii iyadoo quraankii iyo diintii loo dhigayo ayaa xagna barbaarintii sidaa lagu baraa, marka laba dugsi ma kala noqon karayaan.

**Qodobka 15<sup>aad</sup>** Waxaan ku darey **Farqad 3<sup>aad</sup>** oo u dhigan sidan **“ardey kasta oo soo galaya fasalka kowaad waa inuu sitaa aqoonsi muujnaya dugsiisii quraanka ama dugsi ku qaado imtixaan**

**ku saabsan quraanka iyo barbaarinta”**

**Qodobka 16<sup>aad</sup>** isna waxaan ku darey Farqad cusub oo noqoneysa **Farqad 8<sup>aad</sup>** una dhigan sidan **“waa in lagu tababaro ardeyda ciyaaraha kala duwan ayna ku jiraan xiisada ciyaaruhu xiisadaha dugsi”**

**Qodobka 18<sup>aad</sup>** waxaan ka saarayaa inta ah “hadii aan si gaar ah looga dhaafin” waliba intaas aad bay xeerka ugu badan tahey macno ay sameyneysaa Xeer ahaana ma jirto, markaa waxaan soo jeedinayaa in loo daayo oo noqoto sidan **“waxaa ku waajib ah dugsiyada hoose/dhexe inay isticmaalo manhajka ay dejiso Wasaarada Waxbarashadu”** oo inta dambe laga saaro.

**Qodobka 19<sup>aad</sup> Farqada 1<sup>aad</sup>** waxaan iyana ka saarayaa *“hadii aaney Wasaaraddu si gaar ah uga dhaafin”* waxaana leeyahey ha laga dhigo **“Dugsiyada hoose/dhexe waxaa lagu baranayaa maadooyinkiisa caadiga ah af-somaliga”**

**Isla Qodobka 19<sup>aad</sup>** waxaan soo jeedinayaa Farqad cusub oo **Farqad 3<sup>aad</sup>** oo noqoneysaa sidan **“Dugsiyada hoose/dhexe afafka carabiga iyo ingriisigu wuxuu ugu jiraa maado ahaan”** waayo maadada ingriisiga ah dugsiya sare ha lagu dhigo ayaynu nidhi, markaa

waa in dugsiyada hoose/dhexe lagu dhigaa afsomali, afafka carabiga iyo ingriiskuna ugu jiraan maado ayaan.

**Qodobka 23<sup>aad</sup> Farqada 2<sup>aad</sup>** mudada wax lagu baranayo waxaan ku sii darey ama laba sano, waxayna noqoneysaa **“Dugsiyada sare ee farsamada muddada wax lagu bartaa ay noqon karto saddex sano, afar sano ama laba sano”** waayo, hadaad xasuusataan dugsiyadeenii sare qaar baa laba sano ahaa, markaa way soo bixi kartaa dugsiyada farsamo in qaar laba sano lagu barto.

**Qodobka 24<sup>aad</sup>** Waxaan ka saarey inta dambe ee ah “ama dhigooda ee Waxbarasho dadban”, waxaana ka dhigay **“ee sita Cadeynta imtixaan shahaadiga ee Dugsiyada Hoose/Dhexe”** si aanu dugsiyada sare u fadhiisan cid aan sidan shahaadada dugsiyada hoose/dhexe.

**Qodobka 25<sup>aad</sup>** isna waxaan ka saarayaa “hadii aan si gaar ah looga dhaafin” horena waan u soo sheegay intaasi xeerka way ku badan tahey.

**Qodobka 26<sup>aad</sup>** oo farqad kaliyaha ahaa waxaan ku sii darey **Farqada 2<sup>aad</sup>** oo noqoneysaa **“Hadii afafka kale Wasiikru ogolaadey waa inuu qoraal ku cadeeyo asbaabaha looga maarmi waayay qoraalka oo u gudbinayo Golaha Wasiirada oo ogolaan kara ama diidi kara”**

**Qodobka 32<sup>aad</sup> Farqada 2<sup>aad</sup>** waxaan ku sii darey ee **“Waxbarashada Derejada kowaad iyo labaad”** waxayna noqoneysaa **“Waxbarasho guud oo ka saraysa akhris qorista, lehna heerarka kala duwan ee waxbarashada derejada kowaad iyo labaad”**

**Farqada 2<sup>aad</sup>** ee isla qodobkanina waan ku sii darey “oo kala duwan” waxayna noqoneysa farqadu sidan **“xirfad barasho oo kala duwan”**

**Qodobka 33<sup>aad</sup>** Waxaan ku sii darey Qodobkan Farqada cusub oo noqoneysa **Farqada 3<sup>aad</sup>** una dhigan sidan **“Dugsiyada Waxbarashada Dadban waxay noqon karaan qaar lagu barto luuqad ama luuqado gaar ah sida carabiga iyo ingiriisiga”**

**Qodobka 35<sup>aad</sup>** Waxaan ku sii darey Qodobkan Farqada cusub oo noqoneysa **Farqada 6<sup>aad</sup>** una dhigan sidan **“Waxbarashada Farsamada gacanta inta isku mid ahba waa isku manhaj, manhajkoodana waxaa ogolaanaya Wasaarada Waxbarashada”**

**Qodobka 36<sup>aad</sup>** Waxbarashada dadka baahiyaha gaar ah qaba, anigu qodobkaana waxaan ku darey **Farqada 6<sup>aad</sup> iyo 7<sup>aad</sup>, Farqada 6<sup>aad</sup>** waxay noqoneysaa **“dadka baahiyaha gaar ah qaba waxa waxbarashada loo wadayaa ilaa heerka uu qaadan karo”** waayo dadka wax ka dhiman yihiin sida

indhoolaha ama dhagoolaha midba in buu waxbarashada qaadan karaa, mid ayaa qaadan kara ilaa Heer jaamacadeed, midna ilaa dugsi dhexe oo kaliya ayuu qaadan karaa.

**Farqada 7<sup>aad</sup>** waxay ka dhigay **“dadka baahiyaha gaar ah qaba markay ka gudbaan heerkooda waxbarasho ee ay baahan yihiin waxa waajib ah in loo sameeyo shaqo”** waayo baahi gaar buu qabaa, haduu intaa oo dhan dhib ku soo qaatey waa inuu dadka kaga mudnaadaa shaqo abuurka ileyn isagu waxba ma raadsan karee.

**Qodobka 38<sup>aad</sup>** waxaan ku sii darey qodobka xagiisa dame **“iyo shaqaale adeegayaal ah”**

**Qodobka 40<sup>aad</sup> Farqada 1<sup>aad</sup> Xarafka “A”** waxaan ka saarey inta dambe waxaana ka dhigay sidan **“machadyo aan ahayn kuwa gaadhsiisan heer haamacadeed oo hoos yimaada Tacliinta Sare”**.

**Farqada 2<sup>aad</sup>** ee isla qodobkaana waxaan ku darey halkeeda ugu dambeysa **“markey ku haboonaato”**

**Qodobka 41<sup>aad</sup> Farqada 1<sup>aad</sup>** waxaan iyana xaga dambe kaga sii darey **“iyo Shuruudaha Wadanka”**

**Qodobka 46<sup>aad</sup>** Waxaan isna raaciyanaayaa halka ugu dambeysa **“la lana socodsiiyaa waalidkiisa”**

**Qodobka 47<sup>aad</sup> Waxaan** ku darey farqad 3<sup>aad</sup> ooc usub oo noqoneysaa **“dugsi waliba isagaa imtixaanka ka qaadaya ardeydiisa marka laga reebo imtixaanka shahaadiga ah ee fasalada 8aad ee dugsiyada hoose/dhexe iyo 4aad ee dugsiyada sare”**

**Qodobka 49<sup>aad</sup> Farqada 3aad Xarafka “B”** oo ka hadlaya bixinta lacag fadhiisin ah, markaa halkaa anigu waxaan soo jeedinayaaa in lacagta fadhiisinta laga saaro meesha waayo ardey intaas oo sano wax loo soo dhigayay in lacagta fadhiisinta oo aanu kareyn laga reebaa waa mushkilad dadkuna ma wada heli karo, markaa waxaan soo jeedinayaa in lagu badalo farqada sidan **“Dawladdu waxay Miisaniyada uga qoondeynsaa kharashka dejinta, qaadista iyo sixida Imtixaanada shahaadiga ah..”**

**Qodobka 50<sup>aad</sup>** Gudidda Imtixaanaadka Qaranka, halkaa sidey u qoran tahey waxaad moodaa in khalad ku jiro, marka waxaan soo jeedinayaa in laga saaro la xisaabtamaya oo laga dhigo sidan qodobka **“Waxa Xeerka lagu dhisayaa Gudiga imtixaanka Qaranka oo leh qofnimo qaanuuneed iyo madaxbaani maamul iyo maaliyadeed waxayna hoos imanayaa Wasaarada Waxbarashada”**

**Qodobka 51<sup>aad</sup>** Gudiddan waxaa loo qorey inay ka kala imanayaan meelo

badan, anigu waxaan soo jeedinayaa in Gudiddaasi in tirada laga yareeyo oo ay noqoto mid kooban oo go'aanka si fudud u gaadhi kara, oo noqda ilaa 7 xubnood oo kaliya, isla markaana ay noqdaan aqoonyahano lagu xulo aqoontooda iyo waayo aragnimadooda oo aaney noqon ragii Wasaarada Waxbarashada ka shaqeynayay, hadii Wasaarada ragii ka shaqeynayay dee waa waxaba iska buux buuxiya, Markaa waa inay Wasaarada Hoos yimaadaan laakiin ka mada banaanaad.

Sidoo kale waxaan soo jeedinayaa in lagu daro **Farqad 4<sup>aad</sup>** oo ah Xubanaha **“Gudidda Waxaa dhaarinaya Maxkmada racfaanka iyadoo Wasiirka Waxbarashadu goob joog yahey”**

**Qodobka 51<sup>aad</sup> Farqada 3<sup>aad</sup>** Waxaan ku sii xaraf cusub oo ah “G” noqoneysana **“Gudoomiyaha Gudiddu wuxuu dhaarinayaa shaqaale ama masuul kasta o ku shaqo leh arrimaha imtixaanka Qaranka”** waayo maalin walba waxaynu maqalnaa imtixaan baa fashilmey ama la helay, markaa hadii la dhaariyo waa lagu aamini karaa.

**Qodobka 57<sup>aad</sup> Farqada 2<sup>aad</sup>** marka ku-xigeenku heynayo, waxaan ku sii darey farqadaa, “is casilo ama fasax tago”

**Qodobka 58<sup>aad</sup> Farqada 2<sup>aad</sup>** oo sheegaysa in Wasiirku isagoo la tashanaya Agaasimaha Guud ee Wasaarada Waxbarashada Magacaabayaa Madaxa Xafiiska Imtixinaadka Qaranka iyo ku-xigeenkiisa oo ka masuul ah fulinta shaqada xafiiska, waxaan u badalay sidan **“Waxa uu Wasiirku isagoo la tashanaya Agaasimaha Guud ee Wasaarada Waxbarashada uu magacaabayaa Gudoomiyaha, Gudoomiye Ku-xigeenka iyo Agaasinka Fulinta”**

**Farqada 5<sup>aad</sup>** oo ah Madax Imtixaanaadka Qaranku wuxuu masuul ka yahay, waxaan u badalay Halkaa *Madaxa Imtixaanaadka Qaranka* **“Agaasimaha Imtixaanaadka Qaranka”** waayo isagaa qabanayaa hawlaha shaqaada maamulka Xafiiska, Maaliyada iyo maamulka shaqaalaha, Isla Farqadaas **Xarafka “J”** oo ah “iyo hawlaha kale uu u xilsaaro Xeer, Guddigu ama Wasiirku, Waxaan ka dhigay anigoo inta dambe badalaya sidan **“iyo hawlaha kale uu u xilsaaro Xeer ama Gudoomiyaha Gudigu”** waayo wasiir ma maamulo ee waxaa maamulaya Gudoomiyihiisa ama Gudoomiye ku-xigeenkiisa, sidoo kalena Gudoomiyaha ayaa ah madax xafiiska, sidaa darteed, waa in Madaxa Xafiiska loo badalaa Gudoomiyaha.



**Qodobka 60<sup>aad</sup>** qodobkan oo ah Xisaabaadka, Waxaan soo jeedinayaa in sida uu dhigan yahay la badalo maadama oo uu jiro nidaam xisaabeed dawladeed waxaan qodobkan u badalayaa sidan **“Xisaabaadka Xafiiska Imtixaanaadka waxaa loo raacayaa halka la xisaabaadka dawlada ee Xafiisyada kale ee dawalad ee Hanti-dhowraha Guud maro”**

**Qodobka 62<sup>aad</sup> Farqada 5<sup>aad</sup>** oo ah Xilka Waajibaadka Agasimaaha guud waxa lagu qeexayaa Xeer, Waxaan ka dhigay **“Xilka iyo Waajibaadka Agaasimaha Guud waxa loo raacayaa Xeerka Nidaamka Xukuumada lagu jideeyo”**

**Qodobka 63<sup>aad</sup>** waxaan ku daray **Farqad 2<sup>aad</sup>** oo ka hadleysa magacaabista maamulayaasha Dugsiyda Hoose/dhexe ee Gobolada iyo Degmooyinka waxaana ka dhigay **“Gudoomiyaha/Isuduwaha**

**Gobolka ayaa Magacaabaya Maamulayaasha Dugsiyada Hoose/dhexe.**

**Qodobka 64<sup>aad</sup>** waxaan ku darey iyana **farqada 2<sup>aad</sup>** oo ah **“awooda kala badalka macalimiinta degmo gudaheeda waxaa leh Gudoomiyaha Waxbarashada ee Degmada”**

**Qodobka 66<sup>aad</sup>** ee Saraakiisha kale ee waxbarasho oo u dhigan **“Wasaaraddu waxa kale oo ay yeelanaysaa saraakiisha kale ee lagama maarmaanka u ah fulinta hawlaheeda”** waxaan ku sii darey **“si waafaqsan Xeerkan”**

**Qodobka 67<sup>aad</sup>** ee assaasida Gudidda Waxbarasho, waxaan ka saarey inta u dambeysa oo dhaneysa waxaana **la xisaabtamada Wasiirka Waxbarashada iyo Tacliinta Sare,** anigu soo jeedinaya in halkaa lagu badalo **“Waxayna talooyinka Waxbarashada ku saabsan u gudbinayaan Wasiirka Waxbarashada”**

**Qodobka 68<sup>aad</sup>**

**Qodobka 69<sup>aad</sup> Farqada 3<sup>aad</sup>** ee da'da halka 30 sano waxaan soo jeedinayaa in laga dhigo 40 sandood, Farqada 5aad waxaan xaga dambe ka sii raaciyay **“oo Wasaarada Waxbarashada ah”**, si waayo arragnimadiisu u noqoto mid Wasaarada Waxbarashada ah.

**Qodobka 73<sup>aad</sup> Farqada 1<sup>aad</sup>** halka Wasiirka waxaan ku badaley **“Gudoomiyaha Gobol/Isuduwuhu”** waayo Gobolka iyo degmada waxaa u qaabilsan gudoomiye/isuduwe wasiirka. **Farqada 2<sup>aad</sup>** halka Gudidda Waxbarashada heer qaran waxaan u badaley **“Gudidda Waxbarashada heer Gobol” Farqada 3<sup>aad</sup>** waxaan xaga dambe

ka sii raaciyay **“isagoo xeer-hoosaad ku xaqiijinaya”**.

**Qodobka 74<sup>aad</sup> Farqada 1<sup>aad</sup>** waxaan u badaley sidan **“Wasiirku waxa uu awood u leeyahay inu magacaabo Gudiyo kale oo waxbarasho oo u xilsaaran arrimo gaar ah oo ku saleysan xaalad ama arrin cayiman”**

**Qodobka 83<sup>aad</sup>** waxaan ku daray **Xaraf “G”** oo u dhigan sidan **“cadeyo qiimaha laga qaadayo ardayga”**

**Qodobka 84<sup>aad</sup>** ee ruqsad siin ku meel gaadh ah waa khalad ruqsad ku meel gaadh ah, markaa waxaan u badaley ruqsad siin anigoo farqadiisa ku soo ururiyay laba farqadood oo kala ah:-

**Farqada 1<sup>aad</sup> “marka ay dhamaato baadhista qiimeynta wasaarada Waxbarashada kana soo baxaan shuruudaha Xerku jideeyay waxaa la siinayaa ruqsad rasmiya.**

**Farqada 2<sup>aad</sup> “Wasaaradu waxay la galeysaa Heshiis mulkiilaha dugsiga gaar ah”**

**Qodobka 89<sup>aad</sup> Farqada 2<sup>aad</sup> xarafka “A”** ee mulkiilaha waxaan ku sii darey ama Wakiilkiisa waayo hadii mulkiiluhu maqan yahay lalama sugayee Wakiilkiisa ayaa la ogeysiinayaa, markaa waxaan ku darey **“ama Wakiilkiisa”**.

**Qodobka 137<sup>aad</sup>** oo ah qodobka ugu dambeeya, Waxaa ku qoran **“Xeerkani wuxuu dhaqan galayaa marka Baarlamaanku (Wakiilada iyo Guurtida) ansixiyo, Madaxweynuhuna saxiixo, faafinta rasmiga ahna lagu soo saaro”** markaa waxaan soo jeedinayaa inta dambe ee **faafinta rasmiga ah lagu soo saaro**, waayo Xeerku wuxuu dhaqan gala markeynu ansixno Madaxweynuhuna saxiixo, markaa faafinta rasmiga ha ee baryahan xeerarka ku badan kuma xidhna dhaqangalka xeerarku, Intaas ayaan ku soo gabo-gabeynayaa waad mahadsan tihiin.

**Kal-fadhigii 28<sup>aad</sup> Fadhigii 6<sup>aad</sup>**

**Isniin 18/08/2015**

**Fadhigu Wuxuu furmey 10:34AM**

**Gudoomiyaha:-** Baashe Maxamed Faarax

**Quraan:-** Xildibaan Obsiye

**Ajendaha Fadhiga:-** **Dooda Xeerka Waxbarashada maalintii 2aad**

**Md. Maxamud Axmed Obsiye:-**  
(1min 46sec) Shir-gudoonka iyo Mudanayaasha waxaan ku salaamayaa Salaanta Islaamka ASC.

Xeerkani waa Xeer mihiim ah waana xeer dalku u baahan yahay, sida ay xildhibaanadii iga horeeyay soo jeediyeen waxna waan ku taageersanahay waxna waan ku darayaa.

**Qodobka 1<sup>aad</sup> Magaca Xeerka** waxaan soo jeedin lahaa in uu noqodo **Xeerka Waxbarashada Caamka ah**, waayo Waxbarashada sare waxaa ku qoran Xeer kale ayaa loo sameynayaa, Xeerkani markaa waa mid Qaab-dhismeedka Wasaarada iyo Waxbarashada assaasiga ah ka hadlaya, markaa waa Xeerka Waxbarashada Caamka.

**Qodobka 2<sup>aad</sup> Eray bixinta.**

**“Waxbarasho”** waa aqoon-u-kordhinta ama tababarida ardayga, waxaan ku darey iyo barayaasha, waxayna noqoneysaa **“waa aqoon-u-kordhinta ama tababarida ardayga iyo Barayaasha”**

**Dugsiyada Quraanka iyo Dugsiyada Barbaarinta Caruurta,** anigu taas waxaan qabaa in la

mideeyo sidii Xildhibaan faarax sheegay waana ku raacsanahey in la mideeyo dugisyada quraanka iyo Barbaarinta.

**“Afka hooyo ama luuqada Qaranku waa AFsoomali”**, asida ku cad Qodobka 6aad ee Dastuurka luuqada qaranku wuxuu leeyahay **“waa afka Somaliga iyo afka carabiga”** markaa waa in lagu qoro oo lagu daro halkaa luuqada Carabiga oo ah kan labaad waana arrin dastuuriya.

**Qodobka 5<sup>aad</sup> Farqada 1<sup>aad</sup>** kalmadaha Umad, qof iyo qoys waa tilmaamo u baahan in la kala garto oo la kala saaro, Marka halka **Umad** ay ku qoran tahey waa in laga dhigaa **“Shacab”**

**Farqada 2<sup>aad</sup>** halka kobcinta **diinta** ay ku qoran tahey kuma filna intaas waa in la tayeeyo barayasha Diinta islaamka oo farqada badan lagu qeexo, sidoo kale waxaa ku qorn **ku xeel-dheerida cilmiga seyniska**, marka halkaa waxaan soo jeedinayaa waa la balaadhiyo cilmiga oo laga dhigo **ku xeel-dheerida cilmiga Maadiga ah iyo Cilmiga diiniga ah.**

**Farqada 3<sup>aad</sup>** waxaan ku darayaa **“iyo isku kalsooni shakhsiyadeed”**

**Farqada 8<sup>aad</sup>** waxaan ka dhigayaa farqadaa sidan **“Waa in la soo saaro qof muslim ah, muwaadin ah oo islaamnimada ku xeel dheer”**

Waxa kale oo aan ku darayaa Qodobkan Farqad Cusub oo ah tii aan iminka ka hadlayay oo ah xoojinta diinta islaamka barashadeed, markaa waxaan soo jeedinayaa in ujeedooyinka lagu daro Farqadan oo noqoneysa **“in xiisada barashada diinta islamka la xoojiyo oo macalimiintana la tayeeyo”**

**Qodobka 8<sup>aad</sup>** waa qodobka ugu muhiisman ee aan is dul taagayo waa qodobkaas oo ah Waxbarashada Tooska ah, saddexda arrimood tiirarka waxbarashada tooska ahi waa Dariiqa Waxbarashada Manhajka, Qaabka Qiimeynta iyo qaabka Imtixaanka.

**Qodobka 9<sup>aad</sup>** oo ah Heerarka Waxbarashada tooska ah, wuxuu ka tagey Qodobkani Waxbarashadii ku dhisaneyd heerka nidaamak Waxbarashadda oo kala ahaa, **Dariiqa Manhajka waxbarasho, Qaabka qiimeynta iyo Qaabka qiimeynta imtixaanka,** hase yeeshee Qodobkani wuxuu sheegay oo kaliya Heerarka Waxbarashada Tooska, wuxuu ka tagey Manhajkii, wuxuu ka tahey siduu noqonayay

iyo dariiqadii loao marayay iyo mudadii ay qaadanaysay iyo sidoo kale mudadii ay qaadanaysay, waxaan soo jeedinayaa in lagu daro saddexdaa dariiqo ee aan soo sheegay

**Waxaan soo jeedinayaa** in Xeerka lagu daro Qodob Cusub oo ka hadlaya iyana Waxbarashada tooska kuwaas oo kala aan ka dhigay **“Qodob 10<sup>aad</sup>, Qodob 11<sup>aad</sup>, Qodob 12<sup>aad</sup> iyo Qodob 13<sup>aad</sup>** Markaa halkaa in **Qodobka 9<sup>aad</sup>** lagu xjiyo **Qodob 10<sup>aad</sup>** oo noqonayaa sida **“waa in ardeyga la qorayo dugsiga hoose/dhexe lagu xidho shuruud ah sidan”:-**

- 1. In da'diisu tahey 7 jira.**
- 2. Inuu Shahaado ka heysto dugsi quraan iyo barbaarin waliba dugsi la ictiraafsan yahay.**
- 3. Inuu heysto Warqada dhalashada ee dhakhtarka oo xaqiijineysa in da'diisu intaa tahey.**
- 4. In ardeygu yeesho file u gaar ah oo lagu ururiyo cadeymahaa kor**

**Qodobka kale ee aan ku darey waa Qodobka 11<sup>aad</sup>** oo noqonaya **“Manhajka Waxbarashada tooska”**

- 1. Manhajka Waxbarashada tooska ahi Waa manhaj ay sameysay Wasaarada Waxbarashadu si waafaqsan**

**Dastuurka iyo Xeerarka Dalka kuna saxiixan Wasiirka Waxbarashada Somaliland.**

- 2. Wasaaradu Xaq bay u leedahey in ay kaabis iyo wax ka badal ku sameeyso Manhajka Waxbarasho marka oo baahi timaado,** waxaynu la soconaa shaley waxaa la gabo-gabeeyay Manhajkii oo dib u eegis lagu sameeyay waana duruuf sideedana manaahijta caalamka way iska jiraa in mar mar 5tii sanoba mar lagu sameeyo dib u eegis.

**Qodobka 12<sup>aad</sup> Mudada Waxbarashada Tooska ah (Qodob Cusub)**

- 1. Mudada Waxbarashada tooska ahi waa 12 sano oo u kala qeybsanta**  
B) Dugisga hoose/dhexe waa 8 sano  
T) dugisga Sare waa 4 sano.
- 2. Ma banaana in ardeyga ka gudbi waaya fasalka kowaad uu u gudbo fasal ku xiga sabab kasta ha keentee.”** lama qaadan karo ardeyga aan dhameysan mana aha ardey manhajka kowaad ka gudbiy waayay in laga dhigo fasal kowaad.

- 3. Ardeyga laba sano ku hadha fasalka kowaad waa in la geeyaa dugisga farsamada gacanta”**

**Qodobka 13<sup>aad</sup> Qiimeynta Intixaanada (isna Qodob Cusub)**

- 1. Arday kasta oo Waxbarashada tooska ah dhigta sanad dugsiyeedkiisa waa in laba jeer intixaan laga qaado, mid (dhexe) mid-term iyo mid kama dambaysa ah.**
- 2. Ardeyga ka gudba labada intixaan 50% ama sida ay qiimeeyso Wasaaradu, waxa la siinayaa shahaado cadeyneysa in fasalka xiga u gudbay.**
- 3. Ardayga kasta oo u fadhiisan doona intixaanka shahaadiga waa in gudidda intixaanada loo gudbiyaa dhamaan shuruudihii lagu aqbalayay in uu galo intixaanka.**
- 4. Ardayga ay ka maqan yihiin shuruudaha ku xusan farqada 3<sup>aad</sup> uma fadhiisanayo intixaanka shahaadiga h.**

Qodobada 10aad, 11aad, 12aad iyo 13aad waxaan soo jeedinayaa inay sidaa isugu habeysnaadaan.

**Waxaan ku soo gabo-gabeynayaa oo aan soo jeedinayaa arrimahan:-**

1. waa in lagu kaaftoomo ujeedooyinka Waxbarasho ee ku xusan Qodobka 5aad iyo 6aad
2. in Meel kasta oo ku qoran tahey Wasaarada Diinta iyo Awqaabtu loo badalo Wasaarada Awqaafta iyo Arrimaha Diinta Islaamiga
3. Waa in lagu daro afka Carabiga ahi inuu yahay afka labaaad ee rasmiga dalka.
4. In Xiisadaha Barashada diinta islaamka la xoojiyo oo macalimiinta la tayeeyo.
5. Waxaan taageersanahey Warbixinta Lifaaqa Xeerka ee Gudiddu soo jeedisey ee aheyd in dugsiyada Hoose afsomali laga dhigo, waxaana ku sii darayaa ayna la socdaan Xiisadaha Carabiga iyo Diinta Islaamiga ah.
6. Waa in laga saaro Qodobada xambaarsan xeer ayaa qeexi doona.
7. In Dugsiyada Quraanka iyo Barbaarinta la mideeyo sidii uu soo jeediyay Xildhibaan Faarax.
8. In Qodobka 18<sup>aad</sup> waxaan ku raacsanahey Xildhibaan Faarax in la saaro Tacliinta Sare.
9. Qodobka 25<sup>aad</sup> wuxuu ka soo horjeedaa nidaamka waxbarashada, waa in laga saaro.
10. Waxa ugu muhiimsan waa qaab-dhismeedka (Heykalka

idaariga ah) waa in la helaa Wasiir, Ku-xigeenkii, Agaasimihii Guud, Agaasime Waaxeedyadii, Gudiddii Imtixaanada iyo Xafiisyadii, markaa in la helaa qaab-dhismeedkii Wasaarada oo algu daraa Xeerka.

**Md. Cumar Axmed Saleeban (Sanweyne):-** (7min 31sec) anigu waxaan ka hadli lahaa Shaley Wasaaradii Waxbarashadu waxay soo saartey Manhajkii Waxbarashada inana xeerkaa baynu ka doodeynaa, markaa waa in la iswaafajiyo Xeerkan iyo manhajka oo aynu helnaa Manhajkii, marka inagu xeer soo saarno iyana Manhajkii wadaan oo dib u eegis ku sameeyaan waxay noqoneysaa kala socod.

Hadaan Xeerka u soo noqdo, Gudoomiye Xeerku waa basic assaasi, marka waxaan leeyahay:-

- **Luuqooyinka Xeerka** ku jira ee la leeyahay dugsiyada hoose afsomali ha lagu dhigo, aniga waxay ila tahey marka uu laba sano afsomali ku dhigto in af-ingiriisi loo bilaabo.
- **Malcaamadaha quraanka** hadaad soo maro waad ka naxeysaa meesha ay fadhiyaan, markaa waxaan leeyahay waa in Malcaamadaha la saaro culeys oo Wasaaradaha Diinta iyo Awqaafta iyo Waxbarashadu eegaan oo loo dhigaa qawaaniin adag.

- **Tacliinta sare**, waxaad moodaa jaamacadihii qofkii tacliin soo marey oo luuqadii si fiican u yaqaan buu jaamac galayaa, maanta jaamacadaha cid kasta ayaa gasha, waana laga ganacsadaa (Business) markaa waxaan soo jeedinayaa in loo sameeyo Creteria oo lagu saleeyo oo macalimiinta wax dhigeysa la eego.
- **Ardayda la diro**, ardayda la dirayo waa dadkii dalka wax u soo baranayaya, markaa waxay ila tahey in Wasaarada Sharciga loogu daraa in ardayda grade fiican heysa la diro.

**Waxaan soo jeedinayaa ugu dambeyntii:-**

- Waxaan taageerayaa xildhibaanadii soo jeediyay in Tacliinta Sare laga dhigo Wasaarad Tacliinta Sare si looga baxo dhibaataada jaamacadaha ka jira, waan ku raacsanahey in Xeerka lagu daro iyo recommendation-ka in Wasaarada Tacliinta Sare la sameeyo.

**Md. Ibraahim Axmed Haybe:-**  
(25min 32sec) Shir-gudoonka iyo mudanayaashaba waan salamayaa xeerkani waa xeer muhiim ah waxaana uu ka hadlayaa waxbarashada Somaliland, qodob ayaan ka saaray iyo mid ayaan ku darayaa micno badan soo kodhin maysee marka hore waa in aan

aragnaa manhajka oo la darsaa oo aan eegnaa inuu yahay midkii loogu talo galay iyo in aanu ahayn, marka la arko ee la garto inuu yahay mid hagaagsan waxaan isweydiinaynaa sidii aan uga shawayn lahayn.

Dugsiyada hoose dhexe waa meesha ardayga lagu soo dhiso marka laga eego dhinacwalba waana halka ardayga aqoontiisa laga soo bilaabo, laakiin xeerkani tacliinta sare wax uu ka sheegayaa ma jirto sidii uu xil dhibaankii iga horeeyay sheegay 20-30 jaamacadood ayaa dalka ka dhisan oo jaamacad walba sida ay doonto ayay wax u wadaa.

Arday ayaa inoogu jirta jamacadaha oo waxay ku odhanayaan sanadkii laad ama kii 2aad ama wuuba dhamaynayaa hadana wax uu garanayaa ma jirto waxaanad arkaysaa in aanu lahayn aqoontii loo baahmaa ardaygaasi, taasina waxaa keentay jamacadii oo aan ahayd heerkii loogu talo galay iyo siyaabaha ardayda wax loogu dhigo oo aynaan ka warhayn.

Waxaa jirta laba goobood ama laba guddi oo la magacaabay loona magacaabay tacliinta sare, mid waxaa magacaabay wasaarada Waxbarasha, oo inta ay jaamacadaha martay niman aqoon yahano ah ka soo xulatay niman kaasi wax qalaba ama wax isbadal ah oo ayku sameeyeen jamacadaha ma jirto .

Waxaa kale oo jirta Gudidda mihnadlayaasha caafimaadka oo si gaar ah loogu xilsaaray caafimaadka inay eegaan oo wax ka qabtaan tayadooda iyo cida aan ku haboonaynba, jeegareeyaan qalabadooda

Waxaan soo jeedinayaa in wasaarada lakala Qaybiyo oo tacliinta sare loo sameeyo wasaarada cusub muhiimadana la siiyo, ta kale ee aan ka hadlayaa waxaa weeyaan ardaygan aan doonayno inaa gayno waxa ka horeeya ee loo baahan yahay waxaa weeyi dhismaha macalin ilaa dugsi hoose ilaa iyo mid saraba.

Waa in marka hore ladhiso macalinka tayadiisa ama ardaygu marka uu dhameeyo dugsiga sare ama first degree hadii uu rabo in uu noqdo macalin waa in uu helaa dugsiyadii lagu tababarilahaa, taasina meesha mataal maanta oo macalinkii xaataa preparation-kii awood umalahan macalinkii.

Waxaa loo baahan yahay in la dhiso laba arimood mid waa aqoontiisa iyo noloshiisaba, waayo waxaa jira wasaarado miisaaniyadoodu ay is dulsaaran tahay sidaana aan ku ansixino oo aynaan eegin taasna waan ka wada dharagsanahay oo aan ku eegno sidaana kuna gudbino miisaaniyada hadii aan wax laga badalin oo aynu sidaa ku eegno waa

mushkilad, waxaa kale oo aan leeyahay gobol kasta dhakhtaradooda haloo sameeyo macalimiinta qayb kii xanuunsada lagu daaweeyo, waana in la sameeyaa meelo ay macalimiintu ku kulmaan, waayo kor u qaadida waxbarashada qayb laxaad leh ayay ka qaadanaysaa.

Hadii aan eegno sadexda wasaaradood ee ugu shaqaalaha badan waa Wasaarada Maaliyada, Caafimaadka, midna waa Wasaarada Waxbarasha, ta ugu darana waa wax-barashada waayo wasaarada maaliyada qofka xanuunsada degdeg ayaa loo qaadaa oo dhakhaatiirta loo geeyaa, caafimaadkuna wuu dhaamaan, lakiin maalinka cid ka war haysa ama ka warqabtaa midna ma jirto oo waxaad arkaysaa macalin aanay maskaxdiisuba dhanany.

Sidaa awgeed waxaan soo jeedin lahaa in wax qabadka koobaad uu noqdo dhismaha macalinka waayo macalin aan waxba haysan ma soo saari karo aday wanaagsan.

**Qodobka 10<sup>aad</sup>** Maamulka dugsiyada iyo barbaarinta Caruurta:- waxaa si toos ah u maamulaya dugsiyadaa wasaarada Diinta iyo Awqaafta wasaarada waxbarashaduna waxey ku leedahay kormeer waan kala badali lahaa halkaa oo waxaan ka dhigi lahaa waxaa si toos ah u



maamulaya wasaarada waxbarashada, wasaarada diintuna kormeer ayay ku leedahay, si loo xoojiyo diinta waa in ay la socdaan waxbarasho kasta waana in ay manhajyada ka warhayaan.

**Qodobka 15<sup>aad</sup> F/2<sup>aad</sup>** arday kasta oo soo galaya fasalka koowaad waa ianayy bilaabantahay akhriska Quraanku ilaa Jus Cama/ waxaan ka dhigi lahaa halkaa ilaa/ugu yaraan jus Cama. Waana in la eegaa cida quraanka dhigaysa oo aan ka warhaynaa.

**Qodobka 19<sup>aad</sup> F/1<sup>aad</sup>** Dugsiyada hoose/dhexe waxaa lagu baranayaa Afsoomaaliga hadii aanay wasaaraddu si gaar ah uga dhaafin. Waxaan farqadan ka dhigi lahaa Dugsiyada hoose/dhexe waxaa lagu baranayaa Afsoomaali.

**Qodobka 23<sup>aad</sup>** waxaan ku daray **F/4<sup>aad</sup>** Dugsiyada Farsamada Gacanta waayo waa qayb aad u balaadhan oo laa baahan yahay in tayadooda la dhiso.

**Qodobka 51<sup>aad</sup>** Qaabdhismeedka Imtixaanaadka oo uu ka dhigay 13 waxaan ka dhigay 8 Gudoomiyaha iyo ku xigeenkiisa 1qof oo Jamacadaha ah, 1qof oo aqoon yahanka ah iyo 4qof oo gaasime waaxeedyada wasaarada wax barashada ah. Halka ay ku taalo Agaasimaha guudna waxaan ku badalay ayaasimayaasha guud,

halka ay ku qorantahay sedex sanadood waan badaley oo waxaan ka dhigay ugu yaraan 4 sanadood.

**Qodobka 74<sup>aad</sup> Gudidda Waxbarasho ee heer Gobol iyo Degmo** waxaan ku badalay Gudidda waalidiinta heer Gobol iyo Degmo, **F/1<sup>aad</sup>** halku ay ku taalo Wasiirku waxaan ku badalay Gudoomiyaha gobolka/degmo iyo dawlada hoose.

**F/2<sup>aad</sup> Gudoomiyaha heer gobol iyo heer degmo waxay ay hoos imanayaan oo ay la shaqaynayaan Gudidda Waxbarashada Qaranka iyo agaasimaha Guud ee wasaarada** waxaan ku badalay oo aan ka dhigay waxay la shaqaynayaa gudoomiyaha Gobolka iyo degmada waayo iyaga ayaa badbedala oo ku shaqo leh

**Qodobka 74<sup>aad</sup>** qodobkaa gabi ahaanba meesha waan kasaarey

**Qodobka 79<sup>aad</sup>/F/3<sup>aad</sup>** halka ay ku qoran tahay xeer-nidaamiye uu soo saaro wasiirki waxaan ku dari lahaa ama xeer nidaamiye ay gudiddu soo saarto wasaaraduna ansixiso,

**Qodobka 84<sup>aad</sup> Ruqsad siin ku meel gaadh ah** iyadana meesha waan ka saaray waayo mid ku meel gaadhihi ma jirtee mid rasmi ah ayuunbaa jirta

**Qodobka 89<sup>aad</sup> F/2<sup>aad</sup> ee odhanaysa Manoqonayso laalilada ruqsada diwaangalinta goob**

**waxbarasho oo gaar ah ama mid dhaqan gal ah.**

**Waxaan soo jeedinayaa:-**

- Xeerkani waxaa uu u baahan yahay in culays badan lasaaro oo laga shaqeeyo sidaa awgeed waxaan leeyahay dib ha loo celiyo waanad mahadsantihin.

**Md. Ibraahim Axmed Reygal:-**

(11min 05sec) Shir-gudoonka iyo mudanayaashaba waan salamanyihii waxaan doonayaa in aan soo gaabiyo dooda wakhtiga oo gaaban awgii, waxaan doonayaa in aan ka hadlo sadex qayboob, Qaybta 1aad oo ah Eraybiximaha, ereyga 2aad oo ah soojeedin waxyaabo aan aad u taageerayo walib aan aad u taageerayo iyo soo jeedintayda.

Xeerkan waxaan ku magacaabayaa xeerka waxbarashada Somaliland, xeerkan waxaa is barbarasocda Gudoomiyaha iyo isku duwaha, sida aan u fahmayna waxaan moodayay gudoomiyaasha Gobolada iyo badhasaabyada, markaa waxaan leeyahay gudoomiyaha halaga saaro oo ha layidhaa isku duwaha.

Waxaan rabaa in aan ka hadlo sadex Qodob: sida aad ogtihiin waxbarashadu ama la yidhaa waxbarashado sadex tiir ayaa asaasi u ah oo lagama maarmaan ah:-

**B. Macalim**

**T. Manhaj iyo**

**J. Arday.**

Sidaa daraadeed waxaynu u baahanahay in aan sadexdaa qodob ku salayno xeerkan si aan u helno waxbarasho iyo adey dhinacwalba ka dhisan.

**Sidaa awgeed Waxaan soo jeedinayaa:-**

1. Dugsiyada Quraanka ee taxan min malcaamad ilaa madarasad waana halka aw waxbarashadeenu ka soo bilaabmaysay
2. Wasaarada wax-barashada iyo wasaarada Diinta iyo awqaata diinta islaamku in la isku xidho.
3. Tacliinta ilaa iyo intii Somaliland jirtay waxaan awooda saarnay wixii la odhan jiray dadweynaha jahliga halaga saaro, waxaan leeyahay ha ladhiso manhajka iyo malinka.
4. Waxaan taageerayaa qodobkii ahaa in gudiyada heer Gobol, degmo, iyo ku dagmaba bulshadu ka qayb qaadato.

Ugu danbayntii waxaan soo jeedinayaa in xeerkan oo xeer aad u mihiim ah in guddi loo saaro si ay u qabyo tiraan una soo hagaajiyaan waanad mahadsantihin.

## **Kal-fadhigii 28<sup>aad</sup> Fadhigii 7<sup>aad</sup>**

**Isniin 22/08/2015**

**Fadhigu Wuxuu furmey 10:12AM**

**Gudoomiyaha:- Baashe Maxamed Faarax**

**Quraan:- Xildibaan Xuseen Ismaciil**

### **Ajendaha Fadhiga:- Dooda Xeerka Waxbarashada maalintii 3<sup>aad</sup>**

**Soo jeedin Md. Axmed M. Nuur:-** Mudane Gudoomiye, Waxaa jira Xildhibaan Gobol dhan oo mudo ka maqan Golaha markaa Waxaan soo jeedinayaa in arrintooda la eego oo ama Gudi loo saaro ama Gudi lagu wareejiyo.

**Gudoomiyaha:-** arrintaas Xildhibaanada waanu ka wada hadalney iyada oo meel bay mareysaa, Waxaan Gudidda Joogtada farayaa inay Xeer-hoosaadkii Golaha soo gudbiso oo ku wareejiso Xogheynta Golaha, waxaynu bilaabaneynaa Doodii Xeerka Waxbarashada waxaana ku soo dhoweynayaa Xildhibaan Naasir X. Cali Shire.

**Md. Naasir X. Cali Shire:-** (9min 41sec) Shir-gudoonka iyo Mudanayaasha Sharafta leh waad salaaman tihiin, Xeerkan ina horyaal ee Qabyo qoraalka Xeerka Waxbarashada ayaan doonayaa inaan wax yar ka idhaahdo, Mudanayaal waxay iigu muuqataa Xeerkani dhowr qodob inay maqan tahey, Wasaarada Waxa lagu magacaabey Wasaarada Waxbarashada iyo Tacliinta Sare laakiin Xeerkan ina horyaal waxaad moodaa inuu egyahey kaliya oo khuseeyo waxbarashada hoose/dhexe iyo sare oo aan waxba lagaga soo darin Tacliintii sare iyo siyaasadii guud ee tacliinta lagu maamuley oo meesha ka wada maqan.

Sida ku cad **Qodobka 28<sup>aad</sup>** ee Xeerka waxaad moodaa in qodob yar laga soo qaatey laakiin nidaamkii lag dhiqi lahaa tacliinta sare haba yaraatee waxb kagama jiraan.

**Qodobka 29<sup>aad</sup>** waxaa lagu qorey Gudidda Waxbarashada sare, waxaana lagu soo qorey Xeer baa qeexi doonaa, waxaynu ogahey waxaa jira Gudidda Tacliinta Sare (Commission for Higher Education), wayna shaqeyaan iyadoo aan hadana Xeerkii ay ku shaqeyn lahaayeen aanu sameysneyn kana laguma soo darin, taasina waxay cadeyneysaa in siyaasda Gudidda Tacliinta sare inay Xeerkan ka maqan tahey, waxa kale oo xeerkan ka maqan Manhajkii oo aan la garan Karin ujeedooyinka ku cad Manhajka Somaliland, maadaama Manhajka looga baahan yahay inay muuqato Qodobka Xusaya Wadaniyada iyo Halgalnkii, sidoo kale qodobka muujinaya Anshax xumada sida Qaadka iyo Sigaarka, taasina meesha kama muuqato.

Sidaa darteed, anigu waxaan soo jeedinayaa, madaama ay labada qodob ee muhiimka ani meesha ka maqan yihiin in Xeerkan sidiisa dib loogu celiyo ama Gudiddii ka soo shaqeysay lagu celiyo.

Hadaan Qodobada Xeerka hoos ugu sii daadago.

**Qodobada 25<sup>aad</sup> iyo 26<sup>aad</sup>** labadaa qodob oo aad moodo 25<sup>aad</sup> iyo 26<sup>aad</sup>, hadaad eegto Dugsiyada sare qaabka loo marey waxa weeye “dugsi kasta waa inuu isticmaalo manhajka ay dejiso Wasaarada Waxbarashada iyo Tacliinta Sare hadii aan si gaar ah looga dhaafin” Xagee lagu arkey in la yidhaahdo ha laga dhaafo Manhajka manhajna waanu sameysaney, makaa waxaan leeyahay ha laga saaro intaas, waxaana sida ku cad **Qodobada 40<sup>aad</sup> iyo 41<sup>aad</sup>** oo si cad u sheegaya in Manhajka Somaliland lagu dhiganayo dhamaan Dugsiyada Somaliland, wixii ka soo horjeeda Manhajka waa waxba kama jiraan.

**Qodobka 26<sup>aad</sup>** hadaad eegto Afka Waxbarashada Dugsiyada Sare, waxaa ku qoran “Afka Dugsiyada Sare waa afka-ingiriisiga ama Af-carabiga hadi aaney Wasaaradu ogolaan afaf kale, waa sax laakiin waxaan odhan lahaa ha lagu daro Farqada odhaneysa “Maadada Af-somaliga waxaa lagu sii dhigayaa oo ka mid noqoneysaa maadooyinka dugsiyada Sare” waayo waa in ardeygii loo sii wadaa Afkiisii hooyo iyo dhaqankii oo lagu sii dhigto dugsiyada sare.

**Qodobka 33<sup>aad</sup> Farqada 2<sup>aad</sup>** oo ah sidan “iyadoo aan wax loo dhimeyn farqada 1aad waxa la isticmaali karaa luqad aan aheyn tan qaranka, hadii ay sidaasi jirto waa in luqadda qaranku ahaato maado si kastaba ha loo dhigiee” waa maxay Luuqada Qaranku, dee afsomali, markaa waxaa soo jeedinayaa in halkaa lagu cadeeyo luuqada Af-somaliga oo laga saaro luuqada qaranka ileyn waa afsomaliye.

**Qodobka 41<sup>aad</sup> Farqada 2<sup>aad</sup>** waxa odhaneysaa “**Goob kasta oo bixisa Waxbarasho gaar ahi waa inay leedahey manhaj ay oggolaatey Wasaarada Waxbarashadu**” waxaad moodaa inuu ka soo horjeedo **Qodobka 42<sup>aad</sup>** ee ku xiga oo si cad u sheegaya in Manhajka Somaliland yahey Manhajka kaliya ee shaqeyn kara, markaa waxaan leeyahay Farqada ha loo badalo “**Goob kasta oo bixisa Waxbarasho gaar ahi waa in lagu dhigaa Manhajka Somaliland si waafaqsan Qodobka 42<sup>aad</sup>**” si aanu uga hor iman Qodobkaas.

**Qodobka 52<sup>aad</sup>** qodobkaa si buu u qoran yahey xildhibaano iga horeeyayna way sheegeen waana qodob lagu abuurayo Gudidda loo yaqaano Gudidda Imtixaanada Qaranka, laakiinse Waxaa ka maqan in la dhaariyo oo ah mid muhiim ah in la dhaariyo oo halkaa Qodob lagu soo daro noqonaya Dhaarta Gudidda Imtixaanada Qaranka, maadama ay xil qaran oo adag oo ah imtixaanada ay hayaan, waana ku taageersanahey Xildhibaanadii iga horeeyay.

**Qodobka 56<sup>aad</sup>** waa “Awoodaha Gudoomiyaha” sida ku cad Xeerkan waxaa meel kale lagu muujiyay in Gudoomiyaha Gudidda yahey Gudoomiyaha Imtixaanada noqonayo, hadana **Farqada 10<sup>aad</sup>** ee Qodobkan waxaa lagu qorey “*Gudoomiyuhu wuxuu noqon karaa Madaxa Xafiiska Imtixaanaadka Qaranka*” marka waa maxay wuu noqon karaa mar hadii lau sheegay

inuu yahey Gudoomiyaha Intixaanaadka Qaranka, Marka halkkaa ha laga daayo wuxuu noqon karaa.

**Qodobka 58<sup>aad</sup>** oo ka hadlaya Maamulka iyo Agaasinka Intixanaadka Qaranka, Farqada 1aad anigu waxaan odhan lahaa ha laga daayo Xafiis oo ha laga dhigo **“Intixanaadka Qaranku wuxuu yeelanayaa Dhisme u gaar ah oo leh Xafiisyo”** waayo waxay yeelanayaa shaqaale iyo agab ay ku shaqeeyaan, markaa shaqaalaha meeshay ku shaqey lahaayeen iyo halka agabku u oolayo waa inay xafiisyo iyo dhisme u gaar ah noqdaa.

**Qodobka 69<sup>aad</sup> Farqada 4<sup>aad</sup>** oo ah “waa inuu Waxbarasho Heer jaamacadeed ah heystaa ama wax u dhigma, anigu waxaan odhan lahaa farqada wax ha laga badalo oo ha laga dhigo, **“Waa inuu heystaa Waxbarasho Jaamacadeed gaar ahaa Culuumta Waxbarashada ama Culuumata education-ka”** waayo qofku haduu Gudidda ka mid noqnoayo waa inuu heysto Shahaado Jaamacadeed Education ah, hana laga daayo wax u dhigma.

**Waxaan soo jeediyana:-**

- Anigu Qodobadaas ayaan soo jeedinayaa in sidaa wax looga badalo, sidaan hore u sheegayna waxaan qabaa in Xeerka qabyo badani ay ku jirto markaa waa in intaa wax ka badan.

**Md. Farxan Maxamed Cali:-** (9min 58sec) Marka hore waxaan salaamayaa, Shir-gudoonka, Mudanayaasha iyo Saxaafada, mar labaadka anigu qodob badan ka hadli maayo waana soo koobayaa.

**Qodobka 9<sup>aad</sup>** waxaa lagu qorey Waxbarashada Tooska ah, waana intii la yaqaaney ee taqliidiga aheyd la xusey, wakhigana aduunyadu way isbadashey oo technology iyo casri baa la gaadhey tacliinta loo baahan yahey na maaha tii taqliidiga aheyd oo kaliyee waxaa la rabaa in maanta aduunku heer marayo ardeyga loogu diyaariyo siyaasada waxbarashada, tusaale hadaan u soo qaato maanta Europe waxay u soo gudubtey wadama Bariga aduunka ka dib markii wadamadaasi diyaariyeen dad mihnad xirfadeed oo ku shaqeysan karaan leh, waxaan uga jeedaa halkan waxaa ku qoran Waxbarasho ilaa dugsi sae (Secondary) leh oo wax kale kuma soo qorin, markaa waxaa ka maqan siyaasda (Policy) aynu Waxbarashada ka leenahay oo ah in la soo saaro dad minhand leh oo aduunka u shaqo tagi kara oo aduunka wax ka iibin kara.

Maanta Wadamada Khaliijku waxa heysta shaqadoodii dad philipines iyo thieland, wadamada bariga, Tusaale Sucuudiga oo kaliya wuxuu u baahan yahay 125 kun oo nurse, wuxuu u baahan yahay dad farsamo yaqaano ah, carabtii waxay hor ka timi inay garan waayay markay dalalka ka soo qaateen in garan kari waayeen luuqadii ingriiska siday ugu hadlayeen iyo iyagoo aan carabigii la qabsan, markaa waxaa noqontey inay is fami kari waayeen, marka siyaasda loo baahan yahey waa mid ah in dadka waxaynu bareynaa ay noqoto mid uu ku shaqo tagi karo, aduunku wax ka heli karo, Markaa Waxaa halkaa ka maqan Dugsiyadii Xirfadaha iyo Farsamada oo kuma jiraan, markaa inay Siyaasada way inay ku qornaataa, waliba mihnadaasi afkee ku meel

mari kartaa, afsomaliga way hirgashey, laakiin waxaa loo baahan in si ardeygu aduunka ugu shaqo tagi karo in laba luuqadood siyaasada Waxbarashada lagu daro oo kala ah Af-carabiga iyo Luuqada Ingiriisiga.

Halka Xeerku kaga hadlayo Mihnadaha maaha kuwo kufilan, waa in la helaa iskuuladii Mihnadaha iyo Manhajkii Mihnadaha ee qofka u fududeynayay inuu ku shaqeysan karo, 12 sandood oo ilaa dugsi sare ah hadii lagu mashquulo dee qofkii wuxuu doonayaa mihnad uu markaba ku shaqo tago, ardayda Jaamacadaha iyo ardayda Secondaryada dhameysta wax qoshe ah oo Xeerkan ugu qoran ma jiraan, maanta kuma filna Waxbarashada Jaamacadaha ee laga hadlayaa qodobu iyo farqado yar yar, laakiin anigu Waxbarashada Jaamacadeed ama Wasaarada ha laga dhigo ama Wasaarada Waxbarashada ha hoos tagaane waa inuu Xeerku si qoto dheer oo ku filan uga hadlaa Waxbarashada Jaamacadaha Manhajkooda, iyo nidaamkooda iyo dawlada xilka ka saaranba.

Sidaa darteed, Xeerkan Kama dhameystirna Xaga Xirfadaha iyo Mihndaha, kama dhameystirna, xaga Waxbarashada Dugsiyada, Kama dhameystirna Xaga Waxbarashada Jaamacadaha.

Arrinta kale ee aan ka hadlayaa ee meesha ka maqan waxa weeye Xeerkii baynu heynaa Manhajkiina ma heyno, maanta waxaa guul daro ah in Manhajkii kacaanka manhajkeenu halkuu marayo uu ka hooseeyo oo Xisaabtii ardeygu ku dhigan jirey fasalka kowaad ee dugsi sare lagu dhiganayo fasalka afraad ee dugsi sare, waxaa la leeyahay UNISCO ayaa manhajkeenii loo dhiibay oo waxay doonatey Kenyan iyo dad somalidu aad uga aqoon badaneyd oo ka IQ sareysay, markaa waxaa loo baahan yahay in Manhajkeena ay diyaariyaan dad somaliyeed oo aqoon leh oo waxaynu dooneyno ee sameyneyno tacliinteeda garanaya oo ilmaheena garanaya, dadka somalidu manhajka iyo aqoonta aad bay ugu sareeyaan, markaa ardeydeena hadii manhaj qorsheysan loo sameeyo dad aqoon leh baa soo baxaya, maaha in Manhajkeena ay diyaariyaa dad aynu ka aqoon badanahey oo Kenyan loo dhiibo, maanta xisaabti iyo seyniskii form one lagu dhigan jirey ayaa form fourka lagu dhigayaa, markaa Manhajkii Xeerka ha lagu soo lifaaqo.

#### **Waxaan Soo jeedinayaa:-**

- In Manhajkii waa inuu ku jiraa oo lagu soo lifaaqaa Xeerka.
- In Xeerkan dib loogu noqdo isagoo u qoran qaab taqliideed oo aaney tacliinti iyo Waxbarashadii aaney dhameystirneyn.
- Mihnadihii iyo Xirfadihii Xeerkan kuma dhameystirna, waa inay Siyaasada Waxbarashada Qaranka oo lagu daro.

**Md. C/raxman Yuusuf Cartan:-** (22min 24sec) Shir-gduoonka Mudanayaasha Golaha Wakiilada waan idin salaamayaa dhamaantiin, Waxaa loo baahan yahay inuu Xeerkan qeexo Siyaasada Waxbarasho, Xeerkan kuma fadhiyo Siyaasad Waxbarasho oo way ka maqan tahey, markaa hadey ka maqan yihiin wax la meel marin karaa ma jiraan, Xeerkan ma buuxinayo kamana jawaabayo Baahiyaha Waxbarasho ee dalka ka jirta, mar su'aashu waxay tahey hadii

Xeerkii aanu ka turjumeyn oo ka jawaabeyn Baahiyihii waxay ila tahey Golaha Wakiiladu inuu Xeerkan dib loogu celiyo cidii soo dirtey oo baahiyaha loo baahan yahey iyo Mabaa'diida Waxbarasho ee loo doonayo lagu soo daro.

Waxaa loo baahan yahay Siyaaasad ka jawaabeysa baahiyaha Waxbarasho ee Qaranka, waayo waxaynu dooneynaa tacliin u adeegeysa dhaqaaleheena, daryeelka umada wax ku biirineysa, ku wajahan Deegaanka, Xoolaha iyo Kaluumeysiga, ka jawaabeysa Caafimaadkeena, markaa tacliintu waa mid ka jawaabeysa horumarinta intaas oo dhan.

Qodobada Xeerka in badan baa loo baahan yahay in dib loo eego sida Qodobka 1aad inuu ka hadlo Mabaa'diida Waxbarashada, dugsiga hoose waxaa ka horeeya Malcaamadaha Xeerkuna waxba ka sheegi maayo, waxa ku qoran Barbaarinta oo aan u maleynayo inuu loo jeedo xanaanada caruurta waxa la yiraahdo oo Qodobo badan buu Xeerku kaga hadlayaa, Malcaamadihii oo dalka ku baahsan oo dhaqan ahaan ah meelihii dadkoo dhan ka soo aflaxeen oo ay tahey halka caruurta marka ay ugu baahi badan yihiin dhigtaan, Xeerku Waxba ka sheegi maayo haba yaraatee.

Markaa waxa ugu horeeya ha noqdaan Malcaamadaha iyo Xanaanooyinku oo ah (pre-school) ka horeeya Dugsiyada hoose, Cutubka labaad halaga hadlo Dugsiyada Hoose/dhexe iyo Sare oo iyaguna laba qeybood u qeybsamaha sida habkii dhaqanku ahaa wuxuu ahaa ilaa Secondary 12 sanood lagu dhameynayay, waxaa loo baahan yahey in la sameeyo iskuulo farsamo si loo helo dad wax soo saari karaya oo caruurta aan lala sugin intey 12 fasal dhameynayaan 12 sano oo qaar u diyaarino markey ka baxaan fasalka todobaad lagu daro oo la baro farsamooyinka sida kalkaalisoooyinka caafimaadka, qaabka xoolaha uga shaqeeyaan iyo xirfado kale si ay miyigii ugu noqdaan oo u adeegaan dadkii reer miyiga ahaa.

Laakiin maaha arrin ina anfaceysa in 20 kun oo ardey oo secondary ka soo baxay oo aan waxba loo heyn la helo oo aan waxba qaban ka shaqeyn kareyn oo kaliya, arrimahaasna waxaa laga fikiri karaa marka siyaasad Waxbarasho la helo.

Labadaa Cutub marka laga yimaado, cutubka saddexaad noqdo Waxbarashada Gaarka ah, waxbarashada gaarka ahina aaney noqon mid la tartameysa tii Dawlada ee ay noqoto Waxbarasho kaabeysa tan dawlada.

**Qodobka 2aad** ee Erey-bixinta, halka “**Dugsiyada Barbaarinta Caruurta**” barbaarintu waxa loola jeedaa xanaano oo barbaarintu waa erey caruurto dhan u baahan tahey, markaa barbaarintaa “**Xanaano**” ha lagu badalo, sidoo kale “**Agaasimaha Guud**” waxaa ku sii qoran sida waafaqsan **Qodobka 90aad**, Qodobka 90aad kama hadlayo Agaasime Guud ee Wuxuu ka hadlayaa “**Dambiyada la xidhiidha Goobaha Diinwaangalinta**” halkaana ha la saxo tixraaca loo qaatey agaasimaha Guud.

**“Dugsiga gaarka ah”** sida loo fasirey maaha sax dugisga gaarka ah maaha mid aaney dawladu ee mid gaar loo leeyahay, markaa ha laga daayo aaney maamulin dawladu oo ha laga dhigo waa dugsiyada gaarka loo leeyahay.

Qodobka 3aad ee Xadka Adeegsiga Xeerka, waxaa ku qoran Xeerkan waxaa lagaga dhaqmayaa dhamaan xuduudaha Somaliland, markaa maaha in la yidhaahdo Xuduudaha ee waa in la yidhaahdo **“Xeerkan Waxaa lagaga dhaqmayaa dhamaan goobaha waxbarasho ee ku jira xayndaabka Somaliland”** sidaas ayay ku haboon tahey bay ila tahey aniga.

Waxaa Xeerka ku qoran FARACA Xeerkani wuxuu sheegayaa Qodobka, Faraca, Xubinta, Cutubka, markaa in badan baynu joogney waa inuu Goluhu leeyahay internal erey-bixin oo erey kasta wax u naqaano sida Chapter waa inaynu wax u naqaano oo article wax u naqaano, markaa Xeerkani wuxu qorayaa waxyaabo badan sida Qodob, Faraca, Xubinta iyo Cutubka, markaa halkaa confusion baa ku jira.

**Qodobka 10<sup>aad</sup>** Cinwaankiisa oo ah Maamulka Dugsiyada Quraanka iyo Barbaarinta Caruurta, waxaan ka dhigay **“Maamulka Dugsiyada Quraanka iyo Xanaanada”** oo halkii Barbaarinta Xanaanaada ayaan ku badaley dhamaanteed, sidoo kalena Xeerku wuxuu qodobo badan kaga hadlayaa Barbaarinta oo ah Xanaanada sida **Qodobada 10aad ilaa 14aad**, intaas oo dhan waa xanaanada oo kaliya kaga hadli maayo meelna Malcaamadihii, markaa waa meel ka dhac in halkii caruurta ugu badneyd aan Xeerku ka hadlin oo xanaanooyinka iminka la sameeyay oo gaar loo leeyahay laga hadlo.

Sidoo kale isagoo intaas oo qodob xanaano kaga hadlaya hadana kuma qorna shuruudaha qofka furanaya xanaanada laga rabo oo qodob kaliya ma xusayo, yaa furan kara, waxaad moodaa in laga leex leexanayo cida shuruudaha cida furan karta xanaano, markaa waxaa ku jira khaladaad fara-badan oo noocaas ah, qodob ayaa waxa ku qoran Malcaamadaha waxa maamulaya Wasaarada Diinta iyo Awqaafta, waa khalad baan u arkaa waayo Waxbarasho oo dhan waxaa maamulaya Wasaarada Waxbarashada Malcaamada ama Dugsi ha ahaato, hadii cidi la maamulayo dawlaha hoose ayaa la maamuli kara malcaamadaha iyo iskuulada hooseba.

Markaa anigu waxaan soo jeedinayaa waan sheegaye in meelkasta oo ay ku qoran tahey **Barbaarin** loo badalo **“Xanaano” Qodobka 13<sup>aad</sup> Farqadihiisa 4<sup>aad</sup> iyo 5<sup>aad</sup>** contradiction baa ku jira inay iska hor imanayaan ah markaa waxaa loo baahan yahay in la mideeyo oo laga saaro iska hor imaadka.

Xeerka Meelo badan waxaa ku qoran Wasiirka soo saaraya, wasiirka sidaa sameynaya, Wasaaradiina waxay leedahey Agaasime Guud meelna kagama xidhina, agaasimaha guud waa qofka Waxbarashada aad ugu involved-ka ah Wasiirku isagu waa siyaasi oo siyaasada guud buu ka masuul yahay, markaa masuuliyiinta waa inay xilka qaataan oo wax laga daro.



**Qodobka 23<sup>aad</sup> Farqadiisa 2<sup>aad</sup>** waxaa ku qoran **Dugsiyada Sare ee Farsamada oo dudda wax lagu bartaa ay noqon karto saddex ama afar sano**, hadana **farqqada 3<sup>aad</sup>** waxaa ku qoran **“dguada kale ee uu go’aamiyo Wasiirku”**, markaa halaa waxbaa ka si ah.

Luuqadaha waxaa la qorey inay afsomali ku bixi karaan kuwa dawlada ama carabi ku bixi karaan ama ingiriisi ku baxaan, marwalba waa in somaliga lagu dhigtaa, hadey Afcarabi ku baxayaan waa in Afsomaligana lagu baraa, hadey Ingriis saxa ku baxayaana waa in sidoo kale Afsomaligana lagu baraa caruurta.

**Qodobka 50<sup>aad</sup>** Assaasida Gudidda Imtixinaaka Qaranka, waxaa ku qoran qofnimo qaanuuneed, waxaynu istimaali jirney shakhsiyad qaanuuneed oo xeerkana meelo badan kaga jirta, markaa halkaa qofnimo qaanuuneed, ha laga dhigo shakhsiyad qaanuuneed.

**Qodobka 51<sup>aad</sup>** ee Qaab-dhismeedka Gudidda Imtixaanaadka, dhamaan dadka ku jiraa waa agaasimayaashii Waaxaha Wasaarada waana dhowr iyo toban oo iyagii baa Gudiddi laga wada dhigay, anigu garan maayo inay sidaasi sax tahey oo ay haboon tahey, iyadoo shaqo loo direy in iyagii hadana lagu daro gudiddaas.

**Qodobada 63<sup>aad</sup>, 64<sup>aad</sup> iyo 65<sup>aad</sup>** saraakhiisa ku qoran dhamaan waxaa magacaabaya Wasiirka, laakiin masuuliyiintaasi cidey u report-gareyneysa oo warbixinta siineysa ma qorna, Ma Wasiirkey siinayaa, ma Agaasimaha Guud bay siinayaa, marka ma cada masuuliyiintaasi cidey warbixintooda u gudbinayaan.

**Qodobka 78<sup>aad</sup>** Madax-banaanida Waxbarashada gaarka ah, anigu maan fahmin Madax-banaanidaa laga hadlayo ee Waxbarashada gaarka ah,

**Qodobka 83<sup>aad</sup>** Shuruudaha Diiwaangainta ayaa ku qoran, qodobkaasi isdiiwaangainta dugsiyada Waxbarashada gaarka, ma sheegayo wax ka reeban iyo shuruudaha looga baahan yahay, markaa marnaba si wanaagsan uma qeexna shuruudaha looga baahan yahey Dugsiyada Waxbarashada gaarka ah, sidoo kale **Xarafka “C”** wuxuu sheegayaa in la tixraacayo Qodobka 5aad, Qodobkaas 5aad wuxuu ka hadlayay Ujeedooyinka Waxbarashada ee kama hadlayo shuruudaha diiwaangainta Dugsiyada gaarka ah.

**Qodobka 84<sup>aad</sup>** wuxuu sheegayaa “ruqsad siin ku meel-gaadh ah” ku meel gaadh caqli maaha, hadii cidi soo dalbato ruqsad waxbarasho dugsi gaar ah waa in la siiyo ama loo diido, laakiin inta la sameeyo la siiyo oo hadhow u muuqdo mid aan shaqeyn kareyn dee waa khasaare, hadhow hadii loo diiyo wuxuu odhanayaa hadii la ii diido maxkamadaan tagayaa, Markaa anigu Qodobkaa ruqsad ku meel gaadh ah waan ka saarayaa meesha.

**Qodobka 88<sup>aad</sup>** iyo meelo badan oo lacag ganaax ah oo la qaadayo ka hadlayaa waxaa ku qoran lacag aan ka badneyn, markaa aan ka badneyn maxay tahey, anigu waxaan odhan lahaa in halkaa la cadeeyo oo la yidhaahdo **“lacag dhan”** ama **inta u dhaxeysa intaa iyo intaa**, hadii la

yidhaahdo lacag aan ka badneyn laba milyan dee qofka 50 kun iska keen baa la odhan karaa ama wax kale oo aan ka badneyn laba milyan oo ma cada.

**Anigu markaa Waxaan soo jeedinayaa:-**

- Xeerkan maaha Xeer aan ku maamuli karno Waxbarashada iyo Caruurteena ee dib ha loo celiyo, Gudiddii ka soo shaqeysay waxay aheyd inay waxbadan ka soo qabato, Waad mahadsan tihiin.

**Md. Maxamed Axmed Maxamed (Dhakool):-** (7min 42sec) Salaan ka dib, Mudane Gudoomiye dooda bilow ilaa iminka xildhibaanadu waxay qirayaan Xeerkani inaanu aheyn Xeer dhameystiran waana la qabaa ra'yigaa, sidoo kale waxaan la qabaa in Wasaarada Waxbarashada iyo Tacliinta sare in la kala saaro oo aaney is qaadi Karin, waxaad moodaa iminka tacliinta sare inay ka balaadhan tahey heer tacliinta hoose, markaa waxaan soo jeedinayaa intaana xeerka galin in Tacliinta Sare inay mid ka madax banaan oo Miisaaniyadeeda iyo taladeed leh noqoto.

Xeerku Barbaarinta iyo Waxbarashada assaasiga labuu kala kala dhigayaa, waxaan qabaa Waxbarashada assaasiga ee ubadka gacanta lagu qabanayo tarbiyadoodii, akhlaaqiyaadkii iyo diinta islaamka la barayo iyo barbaarinta ama xanaanadu wada socdaan, markaa sida xeerku sheegayo in laga daayo in laba laga kala dhigo ee la israaciyo oo mid laga dhigo oo sida Xeerkuba sheegayo Wasaarada Awqaatu Maamusho.

Markaad Xeerka guda-gasho laba arrimoodba waad ka daremeysaa, arrinta koowaad ee laga dareemayaa waxa weeye in Manhajka iyo caruurta sida wax loo barayaa aaney cadeyn iyo sidoo kale aaney xeerka ku cadeyn doorka waxbarashada islaamiga ahi leedahay, waxa kale oo aan cadeyn Waxbarashada gaarka ah **Qodobada 77<sup>aad</sup> ilaa 90<sup>aad</sup>** ay sheegayaan Waxbarasho gaar ah iyo sida loo jeegareynayo wayna iska hor imaneysa sida xeerka gudihisa ku qoran.

Arrtinta kale ee Xeerka ku soo noqnoqoneysa ee ah waxaa sheegay Xeer Wasiir, inagu xeer wasiir sameynmeynee ha laga saaro taas oo Xeerkani ha noqdo Xeer Wasaaradu ku shaqeyneyso.

Qodobka 7aad Goobaha Waxbarashada Gaarka ah, Xeerku dhinac wuxuu ka leeyahay Waxbarashada gaarka ahi way madax-banaan tahey, hadana dhinaca kale xeerku wuxuu u sameeyay Shuruudo ay Wasaaradu ku jeegareyneso oo ilaa 9 qodob ah, Waxaan leeyahay Waxbarashada gaarka ah tan kale way ka badan tahey machahada ha noqoto ama Malcaamadhaa iyo madaarista ha noqotee, meelaha hal meel buu ka taabanayaa oo ah in caruurta la barayo quraanka kariimka ah ilaa Jiska Cama, meel kale ka taaban maayo, Markaa waxaan leeyaha Xeerkani yaanu noqon mid dabra Waxbarashada gaarka ah oo yaan lagu dabrin.

Xeerkana gabigiisa waxaad moodaa mid Wasiirka mid waxbarasho gaar ah iyo mid dawladeedba uu isagu ku jeegareynayo oo aaney aheyn talo wadaag.

Xeerkan Gudiddii ka soo shaqeysay ha lagu celiyo oo ha ka soo saxaan waxbadana ha ka soo saaraan, waxyaabaha la saxayo ee looga baahan yahay Xeerka waxaa ka mid ah Caruurteena

ilmaha la soo saarao waa ilme nooc ee ah, waa inuu yahey mid la garan kara ha noqoto tan gaarka ah ee Culuumta islaamiga ah lagu barayo ama ha noqoto tan xanaanada la leeyahay, hadaan halkaa qofka laga sixin, waxaa soo baxaya qof noocuu doono ah oo balwada qaadka iyo sigaarka ceeb u heysan, markaa waxaan leeyahay marka la hubiyo inuu bartey culuumtii islaamiga aheyd iyo tarbiyadii ayaa la garan karaa inuu cilmiyadii kalena si fiican u qaadan karo oo wuxuu noqonayaa mid tarbiyad iyo akhlaaq leh markuu tan assaasiga ah soo maro, markaa Waxbarashada assaasiga ha tayeeyo mid barbarian iyo mid tarbiyad islaamiba.

### **Waxaan soo jeedinayaa anigu:-**

- Xeerkan Dib ha loogu celiyo Gudiddii oo Waxyaabahan iska hor imanaya ha laga soo saaro, Culuumta Diinta Islaamkana ha lagu cadeeyo manhajkeenu wuxuu ka leeyahay, WSC.

**Md. Maxamed Xuseen X. Ciise:-** (10min 51sec) Shir-gudoonka Mudanayaasha iyo shaqaalaha Waan salaamayaa, salaam ka bacdi, runtii Xeerkan aynu heyno ee Waxbrashadu sidii mudanayaal badan oo iga horeeyay sheegeen waxaad moodaa in wax badan ka maqan yihiin oo uu qabyo yahey ama siyaasada laga leeyahay iyo ujooyinkiisu wax badan ka maqan yihiin, caadiyad wadan walba markuu xeer waxbarasho sameynayo waxaa jirta ujeedooyin uu ka leeyahay ku saleysan baahiyaha iyo duruufaha waxbarasho ee ka jira, xeerku waa mid balaadhan hadana waxaad moodaa wax badan oo ka hadlayo inay si kale u qoran yihiin.

Aniga aragtideyda halkani waa Somaliland waa mujtamacu asal ahaan Somali ah dhaqankiisa iyo hidhiisuba waxay u saleysan yihiin somalinimo, afka aynu ku hadleyna afsomali, mar hadey sidaa tahey waxbarashadeena iyo qaabkeena nololeedba waa inay ku jiraan hab-dhaqanka soo jireenka ah ee asal ahaan afsomaliga iyo wixii la xidhiidha ah, markaa waxaan leeyahay mar hadii dhaqankeenu yahey soomali waa in la soo saaro qof waxbarashadiisa iyo dhaqankiisa yahey Somali oo Somali wax ku bartay, Waxaan ogahey in Manhajka maanta jiraa yahey mid ka hooseeya kuwii hore wax loogu soo bartey.

Anigu waxaan soo jeedinayaa Waxbarashada dalka Fasalka ugu horeeya ilaa Dugsi sare (secondary) lagu dhigo Af-somali, **(Secondment buu helay)**, aduunka ma garanayo wadan afkiisa wax ku bartey oo la leeyahay wuu ku baaba'ay markii uu afkisii wax ku bartey oo dhaqaalihii iyo horumarkii baa hoos u dhacay.

Hadaad Xeerka eegto, Kama muuqato in dhiirigalinayo adeegsiga afsomaliga iyo in lagu baraarujinayo, dhaqanka somaliland oo la xaqiijiyo, kama muuqato waxa ka muuqata waxyaabo kale oo aad moodo in meele kale laga soo minguuriyay, manhajka waxbarashada Somaliland waxbarashada iminka maynu bilaabin ee boqol sano ayaa wax la soo baranayay, waxbarashadii hore ee ka horeysay intii Somaliland ee somaliga wax lagu dhiganayay ee ku saleysneyd hadey baaba aheyd oo dib ugu dhacney waxaynu odhan laheyn waa in laga guuraa.

Anigoon Xeerka aad gudaha ugu sii galinba waxaa iiga muuqatey in wax badan ka dhiman yihiin oo uu u baahan yahay in dib loogu noqdo oo dib loo eego, waxaan ku saleynayaa waxbarashada ama manhanja Somaliland maanta laga istimaalo waa mid loogu talo-galey sidaan qabo waxbarashada dadku markey dagaalada ka soo baxayaan oo waxaa la yidhaahdnaa (Post-war Education) oo hay'addaha iyo qaramada midoobay waxbarashadu way kula duwan tahey, markaa inaga taa dadka dagaalada ka soo baxa bay inagu saleeyeen inaga iyo somaliyaba maadaama colaado ka jiraa, iyagoo leh ardeyga reer Somaliland maskaxdiisu ma degana oo colaado ayuu ka soo baxay, taasi waa tan keentay inuu ka hooseeyo kii barigii hore oo uu aad uga liito.

Arrinta kale, Xeerkani wuxuu dhisayaa arday kala wada kaan ah mid Somali wax lagu barayo, mid carabi wax lagu barayo, mid ingiriis ah, markaa kaasi wuxuu soo saaraya ardey kala wada mujtamac ah oo kala duwan, Waxaad arkeysaa Hargeysa dugsiyo loogu talo-galey caruur oo lagu xaysiinayo in Macalimiinta iyo Afka lagu dhigayaaba aanu aheyn afsomali oo aad u badan, markaa xeerkani wuxuu dhisayaa dad kawada kaan ah.

#### **Sidaa darteed, anigu waxaan soo jeedinayaa:-**

- In Xeerkani noqdaa Mid soo saaraya oo u adeegaya Bulshada reer Somaliland, Af ahaan, Dhaqan ahaan iyo Diin ahaan oo dadka uu soo saarayo noqdaan dad reer Somaliland ah oo afsomali ku hadlaya, Wax ku baranaya oo dhaqankooda ilaashanaya.
- In Manhajkii Wasaarada Waxbarashada waa in la helaa oo lagu lifaaqo Xeerkan.
- In Xeerkan lagu soo koobnaado Waxbarashada Asaasiga ah ilaa Heer Dugsi Sare.
- In Xeerkan laga saaro Waxbarashada Sare (Higher Education) oo Xeer gaar ah laga dhigaa, isla markaana Wasaarada laga saaro Tacliinta Sare Wasaarada Tacliin Sare ha laga dhigo ama Gudidda Tacliinta Sare.
- In Wasaarada Waxbarashada loo yeedho si wax looga weydiiyo Siyaasada ay Xeerka ka leedahay.

**Gudoomiyaha Dr. Cali Yuusuf:-** hal mudane ayaa hadhey, intaana dooda siin waxaan ku dari lahaa xeerkan ujeedooyinkiisa wax badan baa ka maqan, tan ugu muhiimsan waxa weeye umadeena jaadka oo lagu tilmaamey inuu yahey maandooriye in ardeyda dugsiyada hoose iyo dhexe laga wacyigaliyo, sideynu ogahey waxaynu dibada u dirno oo xoolaha nool ah waxa ka badan inta aynu jaad ku bixino ee ka dirno, dhaqaalaheena wuu baabi'yay, caafimaadkeena wuu baabi'yay, hadeynu nidhaano joojiyo oo ha lala dagaalamo way adag tahey oo ingriiskii iyo dawladii kacaankuba way kari waayeen, markaa waxa wanaagsan in dhalinyarada laga wacyigaliyo taana waxaan soo jeedin lahaa in Ujeedooyinka Xeerka lagu daro, sidoo kale Manhajka lagu daro aqoon badan oo xaga jaadka ah baa soo korodhaye, ingriisku wuu joojiyay isagoon muslim aheyn dhibta inaga heysatana ayna ka heysan dadkii meesha joogey way mahadiyeen, markaa Qodobka in lagu daro Ujeedooyinka Xeerka ayaan soo jeedin lahaa. (Secondment bay soo jeedintaasi heshay)

**Md. Axmed Cabdi Nuur (Kinjandhe):-** (13min 37sec) Xeerkan si fiican baa looga dooday, maanta Waxbarashada dalkeena taala waxaa tusaale kuugu ah ubadkeenu ma heystaan baahiyihii asaasiga ahaa, waxaad arkeysaa dugsii bilaa albaab ah, macalinka dhigayaa waa macalin baahi badani heyso, Markaa waxaa loo baahan yahay Xeerkani inuu noqdo mid ka turjamada Siyaasad Cad oo Waxbarasho.

Waxaan soo jeedinayaa, waa Dawladu kordhisaa Dhaqaalaha ay siiso Waxbarashada oo Miisaaniyada waxbarashada la kordhiyo,

Waa Wasiirka Shaqadiisu noqotaa Waxbarashada Caadiga ah oo aaney tan sare ku jirin, waana in Xiisadaha ay ku jiraan Sports oo iskuu waliba maalintii yeeshaa hal saacad oo physical education ah oo ciyaaro ah taasi waxay yareyneysaa balwadaha iyo dambiyada oo hoos u dhigeysaa, markaa waa in goob kasta oo waxbarasho yeelataa goob sports.

Waa in Malcaamadaha tayadooda kor loo qaado lana hubiyo dadka dhiga, isla markaana Wasaarada Waxbarashadu maamushaa oo ay hoos tagaan.

**Waxaan soo jeedinayaa:-**

- Xeerkani waa Xeer muhiim ah Dadkii ehelka u ahaa ee aqoonta u lahaa ha loo saaro sida C/raxman Cartan iyo C/qaadir Jirde, dib ha loogu noqdo waanad mahadsantihiin.

**Gudoomiyaha Dr. Cali Yuusuf:-** Xildhibaan ku aad buu u mahadsan yahey, Xildhibaanada adkeystay ee jooga aad bay u mahadsan yihiin, waxaad moodaa in Xildhibaanada qaar aroortii ilaa marka u dambeysa jooga oo xilkoodii si fiican uga soo baxay, waxa kale oo jira Xildhibaanada intey yimaadaan oo intey saxiixaan iska baxa markaa kuwaana waxaan leenahay waajibkii ma aydaan gudan, mushaharkiinu xalaal maaha ee dhaqanka ha la badalo.

Barito waxaynu u codeyn doonaa Xeerka Nidaamka Xukuumada markaa wakhti hore ha la yimaado si xeerkaa loogu codeeyo, waad mahadsantihiin.

**Fadhigii Gudoomiyuhu wuu soo xidhay.**

**Cawad Cali Maxamed**  
**Agaasimaha waaxda Hadal Qoraalka G/Wakiilada**

**C/risaaq Siciid Ayaanle**  
**Xoghayaha Guud ee Golaha wakiilada JSI**